# Joogitaanka Wakiilada iyo Dhaqangelinta Kastamka (ICE) ee xarun kasta oo kamid ah Dugsiga Degmada Reynolds

---

**Tilmaamaha iyo Tixraacyada Guud ee Shaqaalaha Degmada Dugsiga Reynolds**

1. Dugsiyadu waxa ku waajib ah inay wax baraan ilmo kasta oo da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 21 jir ee aan dhamaysan fasalka 12aad. Waajibkani kuma xidhna in ilmuhu si sharci ah ku joogo iyo in kale gudaha wadankan Amerika.

2. Shaqaalaha dugsiga degmada Reynolds waa in aysan wax ka weydiin xaaladda aqoonsiga iyo socdaalka ardayga ama tan xubnaha qoyska ardayga.

3. Shaqaaluhu waa in aanay shaacin macluumaadka shakhsiga ah ee arday kasta oo ka tirsan Dugsiga Degmada Reynolds iyada oo la raacayo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo QarINTA Xogta gaarka ah (FERPA), sharuucda ay meel mariyeen gudiyada JO/IGBAB-AR *Maraynta Kaydka Xogta waxbarashada Ardayga* JOA *Macluumaadka bixinaya tilmaanta tooska ah* JOB *iyo Xogta Qaaska ah Ee lagu Aqoonsan Karo shaqsiga*.

4. Dhammaan sharci fulinta iyo codsiyada waraysiga ama baadhista ardayda waa in la sameeyaa si waafaqsan Xeerka Maamulka Degmada Dugsiga Reynolds KN- AR(1) *Xiriirka Hay'adaha Dhaqangelinta Sharciga,* iyo KN-AR(2) *Baaritaanada lagu sameeyo gudaha dhismooyinka dugsiga*.

5. Sarkaal kasta oo ICE ah oo doonaya inuu galo xarun kasta oo kamid ah Dugsiga Degmada Reynolds, dhacdo ay kafaala qaaday xarunta dugsiga Reynolds, ama basaska waa inuu marka hore ogeysiiyaa Kormeeraha Guud, shaqsi ahaan. Ogeysiis ku filan si loo qaado talaabooyinka lagu bixinayo badbaadada shucuureed iyo jireed ee ardayda iyo shaqaalaha dugsiga.

**Nidaamyada iyo Habraaca Shaqaalaha Degmada ReynoldsHaddi ay Dhacda in Wakiilada ICE ay isku dayaan inay galaan xarun kasta oo degmo, dhacdo la kafaalo qaaday, ama baska.**

1. Shaqaalaha RSD waxa la farayaa in ay si degdeg ah u ogeysiiyaan kormeerayaashooda, kaas oo ogaysiin doona xafiiska Kormeeraha guud, joogitaanka wakiilada ICE ee xarun kasta oo kamid ah Dugsiyada reynolds, dhacdo ay degmadu ay kafaalo qaado, ama isku dayga in ay soo galaan baska Degmada.

2. Shaqaalaha RSD waa inay kacodsadaan wakiilada ICE inay si degdeg ah u soo wargaliyaan xafiiska degmada Reynolds.

3. Kormeeraha guud ama wakiilka ayaa waydiin doona aqoonsiga gaarka ah wakiilka ICE, sababta ay u codsanayaan gelitaanka, sidokalana codsan doona ansaxnimada sharciyeed ee u yeedhitaanka.

4. Kormeeraha guud ama wakiilka ayaa dalban doona in saraakiisha ICE ay bixiyaan ogaysiis qoraal ah oo ku saabsan awoodooda sharciga oo u ogalaanaysa in ay galaan gudaha hantida degmada

5. The 5. Kormeeraha guud ama wakiilka waxa uu isku dayi doonaa in uu ogaysiiyo waalidka/masuulka ardayga ka hor inta aan la bixin ogolaanshaha waraysi kaaso wata awood sharci oo ku haboon. Haddii Kormeeraha Guud ama qofka loo igmaday ay awoodi waayaan inay la xiriiraan waalidka/masuulka markaas waa inay sameeyaan isku day macquul ah oo ay ku ogeysiinayaan waalidka/masuulka sida ugu dhaqsaha badan kadib waraysi kasta oo dhacay.

6. Shaqaalaha RSD waa in ay taageera siin ardayda xubnaha qoyskooda la barakiciyay arrin ku salaysan ficil ada shaqaalaha ICE awgeed.